0-6 bilood

# Sida ilmahaaga looga ilaaliyo dhaawac ka soo gaaro guriga, wadada iyo marka ay ciyaarayaan

CHILDSAFETYLINK Here for you.



## Walaaca ugu sarreeya ee ammaanka dhallaankaaga marka ay dhashaan ilaa 6 bilood jirka:

- Ka soo dhaca sariiraha, fadhiga iyo miiska loogu bedelo
- Ku mergashada dareerayaasha ama walxo yaryar
- Neefta ku dhegta marka ay jirto xaaladdo hurdo aan badbaadada lahayn
- Ku gubashada biyo kulul ama dareere kulul ee daaday
- Ku dhaawacma shil baabuur
- Ku xabqasho

## Amaan marka guriga la joogo



- Dhallaankaaga ku jiifi sariir maran oo aan saarnayn waxyaabo badan, bustayaal culus ama xayawaan suufka ka buuxa..
- Dhallaankaaga hal gacan ku sii haay marka aad isticmaalayso miiska aad ugu beddelayso, ama sagxadda ugu beddel.
- Wakhti kasta dhallaankaaga wakhtiga jiifka hal gacan ku sii haay.
- Gacantaada geli oo hubi biyaha aad ugu qubaynayso si aad isaga hubiyo in biyaha aan kulul ku hayn maqaarka dhallaankaaga.
- Liistiga telfoonkaaga ku qoro lambarada xakamaynta sunta deegaankaaga:
  - NB dhexdeeda, wac 811 ama 911.
  - NS dhexdeeda ama PEI, wac 1-800-565-8161.
  - NL dhexdeeda wac 1-844-POISONX

0-6 bilood

# Sida ilmahaaga looga ilaaliyo dhaawac ka soo gaaro guriga, wadada iyo marka ay ciyaarayaan



## Badbaadada wadada

- Markastaaba isticmaal kursiga baabuurka oo gadaal u sii jeedi markaad raacaysaan baabuur, baabuurta xamuulka ama faanka, xataa tagsi markaad qaadanaysaan.
- Kursiga xarigyadiisa oo dhan si fiican u xir.
- Kursiga dhallaanka si ammaan ah u xir. Baabuurka halka suunka uu ku xirmo si fiican ugu jiid; waa inaanu dhaqaaqin in ka yar 1 inji (2.5 cm).
- Dhallaankaaga u labbis dhar hal ka badan oo aan dhab ku ahayn oo kubeerto ama bustana kor ka saar, ka dib marka ilmahaagu si ammaan ah aad suunka ugu xirto.
- Marka aad tagtaan dhallaankaaga ka saar kursiga baabuurka. Kursiga baabuurka ma aha meel ammaan u ah dhallaankaaga oo uu ku seexdo.

## Ciyaar ammaan ah

- Isticmaal tooyga ilkaha ee la qaniino iyo masaajka ciridka oo dabacsan halka ay ka ahaan la'hayd jawaaharaadka ilkaha.
- Raac talooyinka da'da ee tooyada carruurtu ay ku ciyaarto iyo alaabta kale ee ilmaha
- Dhallaankaaga ka caawi inuu wax barto oo koro adiga oo si wadajir la qaadanaya wakhtiga ciyaarta.
- Isticmaatooyga lagu socdol kuraasta dhallaanka, duufoowga, tooyga lagu socdo iyo sariiraha kale ee dhaqdhaqaaqa dhulka.

.

